

Child Care Aware of Washington

Ajeendhada Sharci-dejinta 2021

Xanaanada ilmaha waa u aasaasi dhaqaalaha Washington. Waalidiinta ugu badan ee ilmaha yaryar wey shaqeeyaan, loo shaqeeyayaasha ugu badanna waxaa u jooga shaqaale waalidiin ah. Ganacsiyda gobolkeena waxay khasaaraan bilyanno¹ sanadkasta sababtoo ah kala-go'yada daryeelka ilmaha.

Nidaamka daryeelka carruurta ee Washington wuxuu ku jiray khalalaaso ka hor cudurka safmarkaa ee COVID-19. Fayraska Karoona wuxuu sii xoojiyay nuglaanshaha nidaamka daryeelka caruurta, oo dhalisay saameeyn aad ugu xun dhaqaalaha Washington, caruurta, qoysaska, adeeg-bixiyayaasha xanaanada caruurta iyo bulshooyinka, **khaasatan bulshooyinka caddaanka ahayn.**



Illaa 24% barnaamijta leysinka leh ee xanaanada caruurta ee Washington waxay ugu yaraan u xirmeen si ku meel-gaar ah ilaa Maarso 2020 46%-na dhammaan barnaamijtu waxay sheegeen in ay khatar ugu jiraan xirmid daaim ah



Kumanaan caruur ah oo u dhexeeya 0-5 waxay waayeen helitaanka waxbarasho hore oo tayo iyo muhiimad leh oo ay ku heli jireen daryeelka caruurta



Barnaamijtu waxay la kulmayaan hoos-u-dhac 47% ah isku-celcelis ahaan dhanka isqorista iyo dakhliga waqti kharashaadka hawfulinta kor u kaceen COVID-19 awgiis



Adeeg-bixiyayaasha xanaanada caruurta waa shaqaale aasaasi u ah daryeelidda caruurta shaqaalaha kale ee aasaasiga ah, ayadoo ay jirto khataraha qaadista COVID-19 iyo la'aanta ceymis caafimaad

Dib u dhiska dhaqaalaha Washington wuxuu u baahanyahay nidaam xanaano ilmo oo loo simanyahay oo kobcaya. Child Care Aware ee Washington waxay ugu wacayaan Barasaabka iyo Sharci-dejinta in ay maalgeliyaan xallalka soo socda



- 1. In la siiyo taageero dhaqaale, toos ah oo dabacsan dhamaan barnaamijta xanaanada ilmaha iyo daryeel-bixiyayaasha.** In la siiyo waxbarayaasha daryeelka ilmaha marin ay ku helaan ceymis caafimaad, lagu taageero helidda PPE ee xanaanada ilmaha oo la ilaaliyo ilaha dhaqaaleynta xanaanada ilmaha ee jira.
- 2. In la balaariyo caawimaadda qoysaska shaqeeya si caruurtoodu u tagaan xanaanada ilmaha.** In la yareeyo lacagta jeebka laga bixiyo ee qoysaska xaqa u leh Working Connections Child Care, la siiyo caawimaad qoysaska ka sarreeya 200% Heerka Saboolnimada Federaalka oo la balaariyo taageerooyinka qoysaska ku tiirsan ilmo-haynta Saaxiib Qoyska iyo Deriska.
- 3. In la sii wado ama la siyaadiyo maalgelinnada hadda jira e nidaamka xanaanada caruurta ee Washington si lagu bixiyo taageero muhiim u ah adeeg-bixiyayaasha leysinka leh iyo ilaha waxtarka u leh qoysaska si ay u helaan oo u awoodaan xanaanada ilmaha.** Maalgelinnada tababarka xanaanada ilmaha, ilaha waxtarka u leh qoysaska raadinaya xanaanada ilmaha, caawimaadda qoysaska caruurta yaryar oo guri-la'aanta haysato iyo taageeridda caafimaadka xiska ee baahiyaha caruurta ku jirta xanaanada ilmaha waxay xoojiyaan kaabayaasha xanaanada ilmaha ee Washington waana lagama maarmaan in lagu sii shaqeysiyo. Child Care Aware ee Washington waxay doonaysaa in laga shaqeeyo iskaashiga la jira dhammaan inta ku dadaasha abuuridda iyo wadidda nidaam xanaano ilmo oo xoogan, kala-duwan oo loo simanyahay. Waxaan taageernaa dhammaan dariiqyada iyo dariiqyo kasta oo loogu talagalay maalgelinta xallalkaan muhiimkaa, oo ay ku jirto hagaajinta qaab-dhismeedkeena dib u socodka ee canshuurta. Digniin:

1. Kharashaadka Kor u socda ee warbixinta Xanaanada Ilmaha, Wasaaradda Ganacsiga ee Gobolka Washington, 2019